Amniga Xiliga Qaboobaha

Duufaanada Xiliga Qaboobaha

- Noqo jaar fiican - ka war hel dadka waaweyn iyo qaraabada baahiyaha gaarka ah leh, saaxiibada iyo jaararka si aad u xaqiijiso in ay si ammaan ah isu diirinayaan haystaana cunno iyo biyo ku filan.
- Hubi in dhammaan tuubooyinka hawada ka saara kulayliyaha aanay lahayn wax baraf ah ama wax kale oo awdaya. Xattaa haddii aanu kugu di'in baraf badani, barafka caadiga ah ayaa awdi kara tuubooyinka hawada ka saara kulayliyaha. Tuubooyinka awdan waxay keeni karaan inuu gurigaaga ku ururo Carbon Monoxide-ku. Tijaabi inay shaqaynayaan qalabka dareema qiiqa iyo carbon monoxide-ka hadda.
- Carbon monoxide-ku waa gaas dilaa ah oo bilaa midab ah, bilaa ur ah waxna sumaysa. Sumawga CO waxa uu kugu keeni karaa calaamado la mid ah kuwa hargabka sida madax xanuunka, dawakhaada, yalaalugada, iyo daalka. Haddii aad in badan neefsato waxay kugu keeni kartaa inaad dawakhdo, sidii wax hurdoonayo noqoto miyir doorsoontana. Haddii aad calaamadahan yeelato ka bax guriga oo la xidhiidh cid caawimo ku siisa.
- Haddii aad isticmaalayso matoorka dabka dhaliya, hubi inaad dibada ku isticmaalayso, kana fog yahay daaqaadaha iyo albaabada furan, ama meelaha hawadu kasoo gasho. Tuubada qiiqa ka saarta matoorka dabka dhaliya waxay keeni kartaa in carbon monoxide ku ururo guriga, tanoo ku dili karta.
- Si daggan oo tartiib ah wax ugu gur majarafada(badeelka). Inaad si degdeg ah wax ugu gurto waxay keeni kartaa wadnuhu inuu ku istaago-tanoo ah sabab mihiim ah oo keenta dhimasho inta lagu gudo jiro jiilaalka.
- Diyaar ahaw. Hayso Agabka Xaaladaha Degdegga ah ee Guryaha Wakhtiga Jiilaalka oo dhammaystiran tanoo ay ka mid yihiin tooshashka, raadiyaha gacanta lagu qaadi karo, baytaryo dheeri ah, agabka gargaarka degdegga ah, biyaha caagadda, iyo cunnada aan hore uxumaan.

- Booqo https://www.healthvermont.gov/environment/climate/winter-weather for more health safety information.

Go’itaanada Korontada

- Haddii aad aragto waayar laydh oo soo dhacay, iska dhaaf oo ha udhawaan - markasta uqaado in waayarkaasi koronto sido. Waayarka korontada sidaa waa uu ku dili karaa.
- Haddii aad iska gurayso geedo ama xaabo, HUBI in aanay taabanay waayarka laydhka. Geedaha iyo laamohooda waxay gudbin karaan korontada laydhka waxayna kugu keeni karaan in korontadu kugu dhagto marka aad taabato.
- Ku wargali korontada go’aysa shirkadda korontada.
- Hubi in tuubooyinka biyuhu yiin kuwo dahaadhan. Haddii biyaha tuubada ay baraf noqdaan, aqoonso halka ay tahay inaad ka xidho biyaha hana isticmaalin kan wax lagu afuufo (blow torch) ama dab-ba si aad uga dhalaaliso barafka tuubada. Qalabka timaha lagu qallajiyo ayaa ah qaab ammaan ah oo aad dhibaatadan ku xalliyi kartid.
- Marnaba ha isticmaalin isha kulka dhalisa sida girgire ama foorno waayo waxay keeni karaan khattaraha in dab ka dhasho ama carbon monoxide-ka.
- Wax kasta oo guban kare ka fogee ugu yaraan saddex fiit il kasta oo tamarta kulka dhalisa.

Safarka

- Eeg cimilada iyo xaaladaha waddooyinka ka hor inta aanad bixin ukaxaysona gaadhigaaga kolba sida cimiladu tahay.
- Aayar soco: Uwadista gaadhiga si dhakhso ah waddooyinka jiilaalkii waa sababta koowaad ee keenta shilalka.
- Ujirso ugu yaraan in 3 gaadhi leeg, si aad masaafo fiican oo ku istaagi kartid uheshid.
- Ka nadiifi dhammaan barafka gaadhiga ka hor inta aanad safrin.
- Ka warhay barafka madow ee waddada caadiga ah u eeg.
- Haddii aad gaadhigaagu galo baraf tuulan, yaanu iska daarnaan matoorka baabuurku haddii tuubada qiiqa bixisaa ay aasan tahay. Gaadhigu haddii uu kuu siraadnaado tuubada qiiqa oo aasan waxay kugu keeni kartaa sumawga carbon monoxide-ka.
- Qaado taleefan oo isticmaal 911 haddii xaalad degdeg ahi timaado, laakiin taleefanka kaliya haku tiirsanaanin.
- Tixgeli inaad qaadato Ifayaasha ama milicsadayaal (flares or reflectors).

DIYAARGARAWGA GUUD

- Hubi in gurigaaga inuu kuu yaalo in kaaga filan wax kasta oo aad isticmaasho sida “shidaalka” aad ku kulaylisato gurigaaga.
- Ku hayso gacantaa dhowr shay oo dheeri ah haddii ay dhacdo oo aanad ka bixi karin guriga muddo.
    - Toosh
    - Baytaryo
    - Baytaryada raadiyuhu ku shaqeeyo
    - Biyo
    - Cunnada aan xumaanin
- Weydii magaaladaada hoyga is kulaylineed ee kuugu dhaw halka uu yahay haddii ay dhacdo aad uba baahato. Vermont 2-1-1 waxay haysaa liiska hoy-yada marka ay jiraan hoy-yo furani.

Kalmadaha Cimilada Jiilaalka

- Roobka barafka ah (freezing rain): Roobka barafka noqda marka uu dhulka soo gaadho, isagoo baraf kudul samaynaya waddooyinka, iyo meelaha la lugeeyo
- Sleet: Roobka isu baddala dhagxaan baraf ah ka hor inta aanu dhulka soo gaadhin, taasoo sababta in waddooyinku qaboobaan noqdaana kuwa siisiibanaya
- Talobixinta Cimilada Jiilaalka: Heerkulka aadka uhooseeya, iyo barafku waa mid la filanayo
- Udiyaargarawga Duufaanka Jiilaalka: Cimilada aadka udaran sida barafka aadka ubadan waa macquul inuu da’o maalinta ama labada maalin ee xiga
- Digniinta qabowga/barafawga: Heerkulka ka hooseeya barafawga ayaa la filanayaa
- Digniinta Duufaanka Jiilaalka: Xaaladaha jiilaalka ee daran waa ay bilaabmeen ama dhawaan ayaa ay bilaabmayaan
- Digniinta Dabaysha Barafka Wadata: Barafka aadka ubadan iyo dabaylaha xooggan waxay keenaan baraf da’aya oon waxba laga arkayn, aragti darro, baraf is dul tuulan iyo hawo aad udaran oo nafta khattar galin karta

Xog Dheeraad ah

Booqo Ready Campaigns si aad uhesho xog dheeri ah